

WASAARADDA WAXBARASHADA HIDDAHA  
IYO TACLIINTA SARE

IMTIXAANKA FASALKA 4AAD. 2024

# TAARIIKH



XAFIISKA IMTIXAANKA IYO SHAHAADADA





**Wasaaradda Waxbarashada Hiddaha & Tacliinta Sare**  
**Xafiiska Intixaanaadka iyo Shahaadooyinka Qaranka**

Intixaanka Fasalka 4aad ee Dugsiga Sare

**JUUNYO 2024**

**MAADDADA: Taariikh**

**WAQTI: 2 SAACADOOD**

**FADLAN JAWAABAHA KU QOR BUUGGA JAWAABAHA:**

**QEYBTA 1AAD: GOOBA GALI XARFAHA JAWAABTA SAXDA AH (40 DHIBCOOD)**

- Dowladdii Cusmaaniyiinta waxa ay dhalatay taariikdu markii ay ahayd:  
b) 1299                      t) 1297                      j) 1290                      x) 1899.
- Raysulwasaarhii hore ee Soomaaliya 1956 waxa uu ahaa:  
b) Cabdirashiid Cali Sharmaake      t) Cabdullaahi Ciisse Maxamuud  
j) Cabdirisaaq Xaaji Xuseen      x) Maxamad Xaaji Ibraahim Cigaal.
- Dagaalkii Afbakeyle ee dhexmaray Daraawiish iyo Ingiriisku waxa uu dhacay 3-dii May:  
b) 1920                      t) 1921                      j) 1905                      x) 1901
- Asalka Dowladdii Cusmaaniyiintu waxa uu ahaa:  
b) Iiraaniyiin                      t) Giriig                      j) Turki                      x) Carab.
- Tirada golihii sare ee dowladdii kacaanka waxa ay ahayd:  
b) 23 Xubnood                      t) 25 Xubnood                      j) 26 Xubnood                      x) 24 Xubnood.
- Xarunta rasmiga ah ee Ururka midowga Afrika waa:  
b) Nayroobi                      t) Adis-ababa                      j) Kambaala                      x) Khartuum
- Salaadiintii Cusmaaniyiinta waxaa ka mid ahaa :  
b) Salaxuddiin Al-ayuubi                      t) Sulaymaan Al-qaanuuni  
j) Cabdiraxmaan Al-daakhil                      x) Haaruun Al-rashiid.
- Dadkii ugu horeeyay ee soo degay dhulka Falastiin waxa ay ahaayeen:  
b) Baabilyiin                      t) Faarisiyiin                      j) kaldaaniyiin                      x) kancaaniin
- Ballan-qaadkii Belfoor waxa uu dhacay sanadkii:  
b) 19920                      t) 1919                      j) 1917                      x) 1911
- Xilligii uu soo gaaray IsLaamku Kashmiir waxa ay ahayd:  
b) 80-kii hijriyada                      t) 60-kii hijriyada                      j) 90-kii hijriyada                      x) 100-kii hirriyada.
- Muddadii Dowladda rayidka ee Soomaaliya waxa ay ahayd:  
b) 1954 -1960                      t) 1980 -1991.                      j) 1969 -1980                      x) 1960 – 1969



12. **ABaartii Dabadheer** waxa ay dhacday:  
 b) 1984                      t) 1976                      j) 19674                      x) 1970.
13. Sababihii keenay dagaalkii 2aad ee Adduunka waxaa ka mid ahaa Isballaarintii dawladda:  
 b) Jabbaan                      t) Faransiiska                      j) Turkiga                      x) Jarmalka.
14. Tirada dowladaha xubnaha ka ah golaha ammaanka waa:  
 b) 25 xubnood                      t) 20 xubnood                      j) 15 xubnood                      x) 10 xubnood.
15. Dowladihii asaasay ururka Jaamacdda Carabta waxaa ka mid ahaa:  
 b) Soomaaliya                      t) Marooko                      j) Masar                      x) Falastiin.
16. Tirada dalalka xubnaha ka ah midawga Afrika waa:  
 b) 54 dal                      t) 45 dal                      j) 64 dal                      x) 50 dal
17. Sababihii keenay asaasidda Uruka shirwaynaha Islaamka waxa ka mid ahaa:  
 b) Qabsashadii dhulka falastiin                      t) Gubistii Masjidka Al-aqsaa  
 j) Dagaalkii 2aad ee dunida                      x) Dhicitaankii dowladdii Cusmaaniyiinta.
18. Shirkaa lagu qeybiyey Afrika ee dhacay 1884-tii waxaa lagu qabtay magaalada:  
 b) London                      t) Baariis                      j) Baarliin                      x) Rooma.
19. Asaasihii 1aad ee dowladda Cusmaaniyiinta waxa uu ahaa:  
 b) Haaruun-rashiid                      t) Abujacfar Al-mansuur  
 j) Abuu cabaas Al-safaax.                      x) Cusmaan Ardhogral.
20. Dagaalkii Cadbara ee dalka Suudaan ee dhacay 1898 waxa ku dhintay:  
 b) 4000 oo qof                      t) 3000 oo qof                      j) 2000 oo qqof                      x) 5000 oo qof.

**Qeybta 2aad: Isku xir dhacdada ku jirta shaxda (A) iyo taariikhda ey dhacday ee ku jirta shaxda qeybta (B) (10 dhibcood)**

Tt.	Shaxda (A)	Shaxda (B)
1	Aas aaskii ururka midawga afrika	1969
2	Af gembigii Ciidanka ee dowladdii Soomaaliya	1974
3	Doorashadii Madaxweyne Cabdirashiid Cali Sharmaake	1964
4	Magacaabistii Raysul wasaare C/risaaq Xaaji Xuseen	1967
5	Burburkii dowladdii dhexe ee Soomaaliya	1963
6	Aas aaskii Ururka Qaramada Midoobay	1962
7	Abaartii dabadheer	1991
8	Aasaaskii Ururka SYL	1960
9	Xornimadii Dalka Ruwanda	1945
10	Xornimadii Dalka Toogo	1943



**Qeybta 3aad: ka warceli waydiimaha soo socda oo dhan ( 50 dhibcood)**

1. Sharraxaad kooban ka Bixi soo ifbixii dowladdii Cusmaaniyiinta. (2 dhibcood)
2. Maxammad al-faatix maxaa loogu magacaabay Suldaankii 7aad ee dowladdii Cusmaaniyiinta? (1 dhibac)
3. Sharraxaad kooban ka bixi ujeedooyinkii gumeystuhu u soo galay Soomaaliya? (3 dhibcood)
4. Sheeg 4 ka mid ah sabibihii gudaha ee taagdarreeyey dowladdii Cusmaaniyiinta. (4 dhibcood)
5. Ka hadal muhiimadda gaarka ah ee gobolka Kashmir u leeyahay dalka Baakistaan. (3 dhibcood)
6. Sheeg Magaca madaxwaynayaashii soo maray dowladhii rayidka ee Soomaaliya? (2 dhibcood)
7. Isbarbardhig ku samee ilaha nidaamka dimuqquraadiyada iyo kan Shuurada. (3 dhibcood)
8. Magacow 5ta dowladood ee leh awoodda diidmada qayaxan ee ka tirsan golaha ammaanka. (5 dhibcood)
9. Goorma ayaa Soomaaliya ku biirtay ururka Jaamacaadda carabta? (2 dhibcood)
10. Ka sheeke dadkii ugu horreeyey ee degay dhulka Falastiins (4 dhibcood)
11. Falanqee muhiimadda shuuradu u leedahay bulshada Muslimka ah, adigoo tusaale keenaya. (2 dhibcood)
12. Isbarbardhig ku samee Ururka Jaamacadda carabta iyo kan Midowga Afrika dhanka Ujeedooyinka loo asaasay (3 dhibcood).
13. Fallo kooban ka qor sababihii keenay dagaalkii 2aad ee dunida. (2 dhibcood)
14. Ka soo saar Quraanka kariimka ah 1 aayad oo tilmaamaysa Shuurada. (1 dhibcood)
15. Sharraxaad kooban ka bixi Loolankii dowladihii waaweynaa u galeen dowladnimo gaarsiinta Soomaaliya. (2 dhibcood)
16. Caddee faa'iidada midnimadu u leedahaya horumarka dalkeeenna. (2 dhibcood)
17. Qeex waxyaabaha soo socda: (4 dhibcood)  
b) Dastuur                      t) Sharci.                      j) Muwaaddinnimo                      x) Hijrada Islaamka
18. Sheeg magaalada ay ku taallo Xarunta Ururka Jaamacadda Carabtu. (1 dhibac)
19. Immisa qaybood ayuu gumeystihii u kala qaybiyey dhul- waynihii Soomaalida? (2 dhibcood)
20. Sharraxaad kooban ka bixi sabibihii keenay in ciidamadu la wareegaan xukunka dalka 1969-kii. (2 dhibcood).